

Arbacada Dugsiyada Dadweynaha Portland waa xiran yihiin, Xarunta Xafiiska Dhexe waa furan tahay

Marka la eego jawiga cimilada oo xun, dhammaan Iskuuladii Dugsiyada Dadweynaha Portland waa xiran yihiin Arbacada. Dhammaan hawlihii galinka dambe iyo habeenkii waa la baajiyey, oo ay ka mid yihiin Xannaanada Daryeelka caruurta iyo munaasabadihii ciyaarihii.

Maamulayaasha iskuulada, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale waa in ayna soo shaqo tegin. Shaqaalaha dayactirka iyo nadaafadu waa in ay soo shaqo tegaan.

BESC waa ay furan tahay, shaqaalaha xarunta dhexe waa in ay soo shaqo tagaan haddii ay suurtagal tahay in ay iman karayaan si nabadgelyo leh shaqada. Xafiiska Xarunta Dhexe waa in ay kala xiriiraan madaxdooda ayna ka shaqeyn karaan haddii ay shaqooyinka ay qabanayaan ay suurtagal tahay inay guriga ku qaban karaan.

Go'aanka laga gaarayo Khamiista waxaa la gaari doonaa subaxa hore ee berito.